



Barnmorskemottagningar

Patientinformation QuantiFERON-screening för tuberkulos (TB) översatt till somaliska

2025-07-03

QuantiFERON-test Baaritaan lagu kala caddaynayo qaaxo (TB)

Maxaa lagugu casumayaa tijaabada QuantiFERON?

Daryeelka caafimaadka hooyooyinka wuxuu dhammaan haweenka uurka leh ee ka yimid waddamada ay ku badan tahay cudurka qaaxada (TB ama TBC) inay isbaaraan iyagoo laga qaadayo tijaabo-dhiig. Baaritaanka waxaa sidoo kale lagu casumayaa haweenka uurka leh ee kusoo noolaa xeryaha qaxootiga ama bey'ado halis badan loogu jiro in la isku daarto cudurka qaaxada (TB).

Waa maxay Qaaxo (TB)?

Cudurka Qaaxada (TB) waa caabuq ay sababto bakteeriyada tuberkel. Waxay badanaa ku dhacdaa sambabada, laakiin caabuqu wuxuu ku dhalan karaa qaybaha kale ee jirka. Cudurka qaaxada (TB) waxay caadi ka tahay qaybo badan oo adduunka ka mid ah waana cudur darran. Iswiidhan gudaheeda waxay soo ridataa qiyaastii 600-700 oo qof sannadkii. Dadka ay soo ridato baddankoodu waa dad ku dhashay Iswiidhan dibaddeeda.

Sidee la isku qaadsiiyaa cudurka qaaxada (TB)?

Cudurka qaaxada waxaa laga qaadaa dadka waawayn oo cudurka qaaxada (TB) sambabada oo muuqata qaba. Bakteeriyada waxaa la isugu gudbiyaa hawada markii la qufaco oo qof kale ku neefsado dhibcaha yaryar oo bakteeriyo la socoto. Bakteeriyada qaaxada waxa ugu horreeya ee la isku qaadsiiyaa/qabadsiiyaa waa markii (qofka qaba) la leeyahay xiriir dhow oo wakhti dheer ah.

Waa maxay farqiga u dhexeeya in cudur la qaado iyo in qaaxo (TB) qofku la jirran yahay?

Dadka ku jirrada cudurka qaaxada (TB) waxaa jirkooda ku jira bakteeriya badan oo firfircoon. Waxay caadiyan leeyihiin calaamado jirro (qufac, miisaan dhicid iyo qandho). Haddii aan la daawayn waxay bakteeriyadaas u gudbi karaan oo weerari karaan xubnaha kale. Cudurka qaaxada haddii aan la daawayn waxay keeni kartaa daawacyo abadiyan ah iyo geeri. Qofka xanuunka lagu daartay laakiin aan jirranayn wuxuu qabaa waxa loogu yeero cudurka qaaxada (TB) daahsoon (hurda). Tirada bakteeriyada aad bay u yar tahay mana firfircoona. Qofka lagu daartay ma jirrana mana ku daaran (qabadsiin) karo cid kale. Qofka noloshiisa gudeheeda bay gadaal uga soo kici kartaa oo ku jirran karaa. Sidaas darteed baa daawo la siin karaa dadka xanuunka lagu daartay si looga hortago inay qofka gadaal kasoo ridato, waxa loogu yeero daawayn ka hortag ah.

Tani waxay si gaar ah muhiim u tahay xilliga uurka gudhiisa, maadaama ay korodho halista dumarka markaa umulay ay ugu jiraan in bakteeriyadii hurday (daahsoonayd) ay isu beddesho mid firfircoon, cudurka qaaxada (TB) nooca la isku daarto/qabadsiiyo. Qofka dumarka ah waxay ku daaran kartaa ilmihii markaa dhashay taasoo keeni karta cawaaqib darran.

Maxaa loo sameeyaa baaritaanka QuantiFERON?

Baaritaanka QuantiFERON-test waxaa lagu ogaan karaa cudurka qaaxada midda firfircoon, la isku

daaran/qabadiin karo iyo midda daahsoon (hurda). Qaaxada firfircoon waa in isla markaas la daaweeyo. Waxaa sidoo kale muhiim ah in la helo dumarka uurka leh ee qaba cudurka qaaxada daahsoon, maadaama mararka qaarkood loo baahan yahay daawayn ka hortag ah oo daawo loo bilaabo. Daawadan waxaa la siiyaa uurka kaddib. Waxaa markaas yaraanaya halista in qofka dumarka ah soo ridato qaaxada firfircoon oo halista in ilmaha aw jirradana way yaraanaysa.

Sidee loo sameeyaa baaritaanka QuantiFERON?

Tijaabo dhiig baa gacanta laga qaadaa ayadoo lagu qaado qaabilaadda ummulisooyinka (Barnmorskemottagningen). Tijaabada waxaa lagu soo baaraa shaybaar oo ummulisadaada baa jawaabta dhowr maalmood gudohood ku helaysa.